**Copyright © 2020**

Xuquuqda buuggan wey dhowran tahay, lama daabacan karo, lamana soo saari karo marlabaad, nuqulo kamid ahna lagama samaynkaro iyadoon fasax laga haysan qoraaga buugga.

**Kala xiriir:**

**QORAAGA BUUGGA:**

Abdinaasir ali yalahow

E-mail: Enter Yours@gmail@gmail.com

Tel: +252618350687

Daabacadda 1aad

Madbacadda Yalax Printing Center

Xarunta: Baarubax Muqdisho

Email: yalaxprint@gmail.com

Tell: +252619555001/615241028

## MAHAD NAQ

Waxaa mahad gaar ah iskaleh alaah subxaanahu watacaala, kaasoo naguma maneystay awooda aan ficilkasto kuqabano.

Buuggaan waxaa qoray anigoo ah **Abdinaasir Ali Yalaxoow** waxaan buuggan ugu tala galay dhamaan cidkasta oo u baahan in ay aqrisato taariiqda dalkeena soomaalia. Sidoo kale cidkasta oo danaynaysa inay ogaato in uu dalkeenu leeyahay taariiq fac weyn leh.

# TUSMADA BUUGGA

MAHAD NAQ.......................................................................................... 2

TAARIIKHDA SOMAALIA ........................................................................ 4

TAARIIQDA KOOBAN SOMALIA 1960—2009........................... 11

Xasuuqii Borama 30 Jan 1984 ................................................ 14

Caydiid & Cali Mahdi........................................................... 15

Dr.C/Qaasim Iyo Prof Galeyr ................................................ 19

Golaha Baarlamaanka DFKMG Oo Kuraas Isku Tumay............ 22

GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA DALKEENNA....................... 41

NOOCYADA QEYRAADKA DALKA SOOMAALIYA ...................... 49

KHEYRAADKA BADDA.......................................................... 52

KHEYRAADKA XOOLAHA ...................................................... 58

KHEYRAADKA DHIRTA LA BEERTO.......................................... 59

MAGACYADA GEED MIROODKA KA BAXA DALKEENNA .......... 59

MASAAFADA GOBOLKA BANAADIR IYO DEGMOOYINKA DALKA ............................................................................................ 60

DHAQAALAHA SOOMALIYA .................................................. 63

MAGACYADA HAADDA AMA SHIMBIRAHA KUNOOL SOOMAALIYA ...................................................................... 66

## TAARIIKHDA SOMAALIA

Dalka soomalia waxa uu ku yaala geeska Africa wuxuuna ku fadhiya dhul ay baaxadisu dhantahay 635.541km2, waxa uuna xuduud la wadaga bari waxa kaxiga badwaynta hindiya woqooyi waxa kaxiga jabuuti galbeedna dalka itoobiya  halka koonfurna ay kaxigto dalka Kenya

Dalka soomalia waxa uu yahy dalka labaad ee ugu xeebta dheer qaarada Africa waxayna leedahayxeeb dhirirkedu yahay 3333km tirada dadka somaliyeda waxa lagu qiyaasa 8,000,000 oo qof

60% soomalidu waa dad reer badiyo ah 20% waa dad reer magaal ah 15% waa dad beeeraley ah  iyo 5% oo ah dad kaluumaysato ah

Khubarada Kafaalota tariiqda dalka soomalia waxa ay sheegen in erayga soomalia uu ku taagan yahay laba eray oo kala ah (soo-maal}  iyadoo eraygas micnihiisa loola jeedo soco, halka erayga maal oo micnihiisa kaso jeedo lis

Marka labadaas eray lisku daro waxa uu noqonayaa (maal saca”

Qubarada qaarkood ayaa waxa ay shegaan in magaca soomaali uu asal ahaan kazoo jeedo erayga carabiga ee ah (Duu-maa} oo la macno ah shacab xoolo badan leh

Sooyalka taariiqda qadiimiga ah ayaa waxa laga helayaa macno kale ayadoo qubaradu ay ku doodayan in eraygaasi uu ka yimid (samaala} oo macnihiisu yahay ninkii waranka dheera

Samaala ayaa la sheega in uu aha ab iyo waziirkii ay kazoo faracmeen dadka soomaliyed (aw- samaale}

Taariiq ahaan dalkaygu waxa uu laahani jiray xadaarad facwayn waxana dalkeenu loo aqooni jiray magacyo fara badan sida dhulkii udgoona, dhulkii eebe io geeska Africa

Caasimada dalkeena waa MUQDISHO tan labaadna waa HARGAYSA  tan sedaxadna waa KISMAAYO tan afaradna waa BURCO halka tan shanaadna ay tahy magalada BAYDHABO,

Goboladii ugu horeeyey ee xurnimadasa qaatay dalkeena waxa uu ahaa gobolka woqooyi waxayna xurnimadooda ay qateen 26kii bishii june sanadii 1960kii

Shirkii gumaystayashii Africa ee lagu qeybsaday waxa uu ka dhacay magaalada baarliin ee dalka jarmalka taariiqdu markay ahayd 1884tii ayaa dalka soomaliya loogu qaybiyey 5 qeybood waxayna shantaasi qayb kala yihiin

1. gobolada woqooyi oo lasiiyey gumaystihii ingiriiska
2. gobolada koonfureed oo lasiiyey gumaystihii talyaaniga
3. xeebta soomliyeed ee jabuuti ee loo dhiibay gumaystihii faransiiska
4. N ,F,D oo ayadana lasiiyey dalka Kenya
5. iyo gobolada soomali galbeed oo gacanta loo geliyey dowlada itoobiya

Shantaasi gobol waxaa lisku yirahda shanta soomaliyed

Taariiqdu markii ay aheyd 27kii bishii june 1977dii ayey jabuuti ayadana xurnimadeedii ay qadatay

waxaase wali gacanta gumaystaha ku jira soomali galbeed iyo N,F,D

Hadaba markii ay xurnimada qaaten gobolada koonfureed sanadii 1960kii waxay ahaayen lix gobo loo kala ahaa GOBOLKA BANAADIR GOBOLKA HIIRAAN GOBOLKA MUDUG IYO GOBOLKA BARI sidoo kale waxaa iyana kusoo darsamay goboladii woqooyi ee ayaguna isla sanadkaas xornimada qaatay waxayna kusoo darsamen konfurta labadii gobo lee xiligaasi gobolada woqooyi waxaa laysku orani jiray gobolka woqooyi galbeed iyo gobolka togdheer waxayna sidaas isku noqdeen goboladii jamuuriyada sideed gobol ,

Markii uu kacaankii millatariga ahaa uu dalkii qabsaday ayaa waxa la qaaday ololihii horumarinta reer miyiga sanadku markii uu ahaa 1973dii ilaa 1974tii xiligaaso ay timid baahi weyn oo aheyd in la magacaabo gobolo kale markaas waxa sideedii gopol lagu kordhiyey todobo gobo loo kale waxayna tirade guud ee gobolada dalka isku noqdeen shan io taban gobol bilowgii sanadii 1980kii waxaa lagu soo kordhiyey gobolka JUBBADA DHEXE dawayaaqadii sideetan meeyadii aya iyana la magacaabay SOOL IYO

AWDAL xiligaaso tirada gobolada dalku ay noqdeen sided iyo taban gobol

Umad kasta waxa ay leedahay taariiq iyo waayo taxane ah taariiqdana waxa sameeya dadka , wallow fackasta uu ku dhaqmo tubtii ay u jeexeen jiilkii ayaga ka horeeyey soomalia waxa ay kamid tahay dalalka faca & taariiqda wayn gaar ahan geeska Africa

SOMALIA waxay gobanimadeedi hanatay 1dii july, sanadii 1960kii iyadoo dagaalkii ay lagalen gumaystayaashii uu ahaa mid soo jiitamayey mudo Aad udheer taariiqduna ma illowdo dadkii ama xubnahii usoo halgamay qaranimada sidaas darted umadkasta ma hiigsato horumarka nolosha hadii aanay haysanini hogaamiyeyaal uhagar baxa umad kasta waxa ay lee dahay taariiqa ayaga ugaar ah oo lagu xasuusto halgamadii  iyo marxaladihii ay soo mareen dhismaha nolosheeda &jiritaanka qaranimadeeda , taariiqdas oo kale waxaa noo horseeday geesiyaal kazoo dhaxbaxay bulshada kuwaas oo hormuud unoqda himilada shacbiga isla markaana ay katilman qataan

SOOMALIA waxay kamid tahay dalalka aduunka eek u can baxay halgankii ay usoo galeen hanashada

gobonimada dalka jamuuriyada soomaliya waxay xusid mudan in ay dadka soomaliyed ay yihiin unad an ogolayn adoonsi & iyo cadaadiskii lalaga kulmay isticmaarka oo ay kaga soo horjeeday gunimada & iyo dhagartii gumaysiga

Taariiq ahaan wixii ka horeeyey qarnigii 18aad intii uusan bilaawan duulaankii dhulka soomalia qeybsaday soomaalidu waxay dhaqan & dhaqaalo ahaanba ku tiirsanayen caalamka islaamka gaar ahaaan dhulalka xeebaha ku teedsan ee kala aha Banaadir Berbera & Bosaaso.

Qaybintii dhulka soomalia kadib waxa abuurmay nidaamyo ku cusub bulshada soomalida kana duwan xeerarkii & shuruucdii ay ku dhaqmi jireen umada soomaliyed waxaana Aad u yaraaday xiriirki ay somaalidu la lahaayeen dalalkii islaamaka iyadoo meelo badan ay ka bilaawden dhaqdhaqaaqyo lagaga soo horjeedo maamulkii soo galootiga ahaa ee gumaystaha

Dhaqdhaqaaqyadii ugu cansana ee looga soo harjeeday waxaa kamid ahaa kii amaam axmed ibraahim axmed guray & midkii sayid cabdule xasan ee dahamaaday 1921kii , ayadoo halgamadaasi ay ujeedadoodu aheyd sidii dib loogu soocelin lahaa

dhulyowgii dadka soomaliyed ee gumaystuhu qabsaday

Horaantii sanadkii 1940kii waxaa qaybo badan oo dhulka soomaliyeed ee gacanta ugalay gumaysigii dalka qabsaday kabilaawday dhaq dhaqaaaqyo tiro dhaafay ururadii SYL & SNL ay bilaawen dhaq dhaqaaqyadii caanka noqday ee looga soo horjeeday gumaysiga

Sidaas darteed markii ay madaxbanaanida gaareen gobolada woqooyi ee soomalia  26kii bishii june 1960kii

& gobolada koonfureed ee soomalia  waxay midoowen 1dii luulyo 1960 kii  midnimadaasi kadib ayaa waxa lisku raacay in labadasi gobol ee midoobay in ay qaataan magaca;- JAMUURIYADA SOOMALIA AMA SOMALI REPUBLIC

## TAARIIQDA KOOBAN SOMALIA 1960—2009

July 1, 1960kii xoryadii & midoowgii dad soomaliyed laga soo bilaawo dabayaaqadii 19aad ay gumaysan jireen ingiriiska & talyaaniga

July 1, 1960kii waxa madaxwaynihi ugu horeeyey ee soomalia noqday Adan abdule ismaan adan cade waxa uuna madaxweyne ahaa ilaa june 10 , 1967dii markaas kadib waxa dhacday doorasho uu xilka madawenenimo kula wareegay madaxweyne c/rashiiid ali sharmaake

Aadan cade waxa uu noola intii u dhaxaysay 1908 ilaa june 8, 2007

JAN 1962dii NELSON ROLIHLAHLA MANDELA ayaa umahad celiyeyey afar wadan oo ay ku jirto soomalia mandela waxa uu markasi ka qudbaynaye shirkii pan—africa ee lagu qabtay magalada adis ababa ee dalka itoobiya asagoo umahadceliyey afarta dal ee Africa kamid ah oo xiligaasi kamidka ah dalalka xorta ah kuwaasi oo joogay kulankaas waxana kamid ah somaalia ethopia sudan iyo tanganyka waxa uuna mandela dalalkaasi ugu mahadceliyey sidii ay cunaqabateynta siyaasadeed & mida dhaqaale usaaren dowladii markaas midab takoorka ku

haysatay koonfur afirca  iyo sida ay dalalkaasi magangalyo usiiyen qoxootiga reer koonfur Africa

June 10 , 1967 waxaa soomaliya madaxweyne ka noqday C/RASHIID ALI SHARMAKE ogtobar 15, 1969 ayaaa ladilay madaxweyne c/rashiid asagoo booqasho kumaraya laascanood

(c/rashiid ali sharmake } waxa uu noola intii u dhaxaysay  1919  ilaa octoober 15,, 1969

Octoobar 21; 1969kii waxa dalka ka dhacay inqilaab milateri aan dhiig ku daadanin waxaana sidas xukunka ku qabsaday maxamed siyaad bare

Oct 21 ,, 1972dii waxaa si rasmi ah  loo qoray afka soomaliga oo wixii xiligaasi ka horeeyey aan qorneyn balse soomalidu waligood ku hadli jireen

Jan 23, 1975—culumo soomaliyed ayaa ka dhii dhiyey sharci ay soo rogtay xukuumadi maxamed siyad bare sharcigaas oo ka hor imanaye

( quraanka karimka qowlkii eebe } madaama dadka soomaliyed 100% ay muslim suni ah ay u cuntami waysay xukunkaas culumaduna ay ka gadooden waxana loogu jabaabay in taoban culimadi kamid ah

lagu xukumay dil toogasho ah waxana culumadas lagu toogtay muqdisho 23/1/1975tii

ABRIL 9, 1978dii waxa dhicisoobay inqilaab lala maagana in lagu rido xukuumadii siyaad bare waxana la toogtay 17 kamid ahaa ragii inqilaabka lagu tuhmaayey oo uu ku jiro col, maxamed sheeq cismaan oo hogaaminayey inqilaabka xiligaas waxaa dalka soomalia ka baxsaday c/laahi yuusuf axmed maadama uu kamid aha ragii kujiray fulinta inqilaabkaas (inqilaabku wuxuu qorshaysna inuu dhoco abril 12, 1978 laakin waa uu kazoo horumaray oo wuxuu dhacay tariiqdu markay aheyd april 9, 1978 waana uu dhicisooway}

## Xasuuqii Borama 30 Jan 1984

Sebt 1978dii col c/laahi yuusuf ayaa asaasay mucaradkii ugu horeeyey ee taariida dalka soomaalia waana jabhadii (ssf} taaso bishii ogtoobar isku bedeshay (SSDF)

Janaayo 30, 1984; weerar diyaaradeed ee ay la beegsatay boorama waxay ku xasuuqday 37 arday oo da,doodu udhaxayso (6—14) sano & afar macalin halka dhaawacana uu kor udhaafay (39) arday iyo 5 macalin waxa kaloo dadka ku naafooway weerarkasi kamid ahaa 4 hooyo oo xaamiloyin ahaa kuwaasi oo kusugnaa mchka
Aug 7, 1990 jabhadii snm (oo la asaasay april 1981) usc (oo iyana la asaasay 1989) iyo spm (oo la asaasay march 1989) ayaa u midoobay sidii ay utuuri lahayeen xukuumadii siyaad bare
Jan 27, 1991 siyaad bare ayaa kabaxay caasimada somalia ee muqdisho jabhaduna ay halkasi qabsatay

## Caydiid & Cali Mahdi

Nov 17 1991 awood ku dagaalankii udhaxeeyay qabqablayashii dagaalka ee maxamed farax caydiid & ali mahdi maxamed aya isku rogay dagaal ay kumanan shacab ah ay ku dhintaan

March 3, 1992 qabqablayashii iska soo horjeday ayaa wada saxiixday heshiis xabad joojin ah oo ay soo abaabushay qaramada midoobay laakiin waxa ay qabqablayashu ku heshiin wayen sida loo maraynayo xabad joojinta

April 24 1992 golaha amaanka ee qaramada midoobe ayaa ogolaaday in somaalia loo diro 50 qof oo kor ka ilaaliya xabad jojintii lakala saxiixday iyo siyaad bare oo dalkii iskaga baxy

SEPT 19,1992_ qabqablaha dagaalka ee maxamed farax caydiid oo ku laabtay muqdisho , isla mar ahaantana diiday in lakeeno ciidamada nabad ilaalinta

Dec 3, 1992 _ golaha amaanka ee qaramada midoobay ayaa go,aamiyey in soomali loo diro ciidamo hubaysan oo nabad ilaalin ah oo uu hogaaminayo maraykanku

Dec 9,1992 ciidamada bada ee maraykanka oo caga dhigtay xeebta magalada muqdisho ayagoo wata magacii rajo soocelinta

Jan’15 1993- wada hadal ay soo qaban qaabisay qaramada midoobe oo lagu qabtay magalada adis ababa ee dalka itoobia ayaa maleeshiyooyinkii iskaga soo horjeeday soomalia ay ku kala saxiixden heshiis ay ku joojinayan dagaalka ; heshiiskas oo kamid ahaa heshiisyo badan oo ay kala saxiixden

May,4,1993 maraykanka ayaa hogaaminta ciidamadii howl galka ka waday somaali ku wareejiyey qaramada midoobe

Oct 3,1993 sideed iyo toban askari oo katirsan ciidamada mareykanka iyo hal askeri oo maleeysian ah ayaa la dilay waxaana la dhaawacay 74 maraykan ah kadib markii muqdisho lagu soo riday labo helicomter oo mareykanku leeyahay maydadki askartii ladilay aya lagu jiiday wadooyinka muqdisho markii danbe arrintaasi waxa laga sameeyey filim labaxay black hawk down

March 28,1994 howlgalkii mareykanku ka waday soomalia ayaa lasoo afjaray

Feb 28,1995 maxamed siyaad bare aya ku geeriyooday magaalada lagos ee dalka Nigeria (siyaad bare waxa uu noolaa intii u dhaxaysay 1919 ilaa January 2,1995)

Feb 28,1995 ciidamada bada ee mareykanka iyo ciidamada talyaaniga ayaa ka qeyb qaatay daad gureyntii ciidamada qaramada midoobey oo laga daad gureeyey somaalia

Aug 1, 1996 maxamed faarax ceydiid ayaa u geeriyooday dhaawac soo garay

(ceydiid waxa uu noolaa intii u dhaxaysay December 15,1934 Ilaaa Augusto 1,1996)

Haamaha Sunta Wa Kuwa 1997/1998

Jariirada kazoo baxday dalka talyaaniga oo lagu magacaabo famiglia Cristiana ayaa daabacday qoraalo xariir ah oo si waadax ah u faah faahinaya edaymo la xariira sunta lagu duugay soomalia oo ay jariiradu magacawday laba shirkadood oo kala ah achair partners ( swiss) iyo progresso (Italian) baaritankaas jariirada waxaa ka danbeeyey in European green party ay warbaahinta usoo bandhigeen isla mar ahaantana ay baarlamaanka

yurub u gud biyeen nuqulo kamid ah heshiis ay ay la kala saxiixden labadas shirkadood iyo nin metelaayey madaxwenihii soomali  cali Mahdi maxamed heshiiskas oo ahaa in soomalia lagu duugo sun (toxic waste) oo miisaankeedu dhan yahay 10 milion tonnes taas oo loogu bedeshay $80 milion oo doolar ilaa xiligaasi wixii ka dambeeyey cali Mahdi waxa uu diidana in uu arintaasi ka hadlo in kasta oo baarlamaanka talyaaniga baaritaan dambe oo uu sameeyey uu ku cadeeyey in heshiiskaasi uu dhacay DECEMBER 1991 waxaana cali Mahdi maxamed mamulkiisa u saxiixay waziirkiisa caafimaadka nuur cilmi cusmaan (nuur elmy Osman)waxaana qorshuhu uu ahaa in sanadkiiba soomali lagu duugo sun miisaankedu dhan yahay 500,000 tones

May 2,2000  shir lagu heshiisinaye somaalia ay aka bilowday tuulada carta ee dalka jabuuti

Shirkaasi oo ay ka qeyb galeen in ka badan 2,000 oo hogaamiyeyaashii somaalida ah

## Dr.C/Qaasim Iyo Prof Galeyr

Aug 13 , 2000 waxaa dibada loo tagay dowladii kumeel gaarka ahayd dowladaas oo la siiyay mudo sedax sano ah in ay heshiis ka dhax dahaliso dadka soomaaliyed waxaana dowladaasi madaxweyne ka noqday c/qaasin salaad xassan reysal wazaarena wax aka noqday cali qaliif galeyr

Jun 5, 2001 maxamed cawaale liibaan oo ahaa ninkii sameeyey calanka soomalia ayaa ku geeriyooday magaalada Toronto ee dalka Canada

May 3, 2002 maxamed xaaji ibraahin cigaal ayaa ku geeriyooday magaalada Pretoria ee dalka south Africa waxa uuna soo noqday reysal wazaarihii soomalia intii u dhaxaysay 26kii tune 1960 ilaa 12kii july 1960 ( cigaal waxa uu noolaa intii u dhaxaysay augusto 15, 1928 ilaa may 3, 2002)

Act 15, 2002 shirkii 14aad ee nabadaynta soomalia ayaa ka furmay magaalada eldoret ee dalka Kenya

Sept 15, 2003 waxaa lagu heshiisiyey axdiga kumeel gaarka ah ee soomaalia iyo in dowlad la dhisaayo ay cod bixin dalka ku gaarsiin doonto mudo shan sanadood ah taas oo ku xigtay makii uu dhamaaday

waqtigii sedaxda sano ee dowladii hore ee kumeel gaarka ahayd dowladaan cusub ayaa loo bixiyey (dfkmg dowlada federaalka kumeel gaarka ah)

Aug 2004- wafdiyadii ka qayb galay shirka soomaalida uga socday dalka Kenya  ayaa lagu doortay 275 xilibaan kuwaas oo lagu soo xulay hab qabiil oo loo bixiyey 4.5

Act 10 ,2004 baarlamaanka FKMG ayaa madaxweyne waxa ay u doorteen c/laahi yuusuf axmed oo ay itoobia taageersan tahay

Nov 3, 2004 madaxweynaha FKMG ayaa ra,iisal awzaare u magacaabay cali maxmed geedi

Dec 1,2004 ra,iisal wazaaraha magacaaban ee cali maxamed geedi ayaa dhaariyey xukuunadiisa oo ka koobnayd 27 waziir

Jan 31,2005 – waxaa magaalda muqdisho ay dabley hubaysani ay toogasho ay ku dileen sarkaal soomaali ah oo lagu magacaabi jiray HIRSI CUMAR DHORRE taas oo loo macneeyey in lagu wiiqaayo awooda xukuumada cusub DFKMG. Midowga Africa oo kulankooda lagu qabtay dalka Nigeria waxay ku an sixiyeen in soomaalia loo diro ciidamada shan dal oo

ka tirsan africada bari (IGAD) si ay dowlada cusub ee soomaalia uga kaalmeeyan sidii ay u degi lahayd soomaalia shantaas dal oo kala ah itoobia Djibouti Eritrea Kenya io sudan

Feb 9, 2005 cusmaan cali caato (oo ay hay,ada reuters ku tilamaamtay qab qablaha dagaalka ahna waziir ka tirsan dowlada) ayaa soomaalia waxa uu ugu baaqay in ay weerar kala hortagaan ciidamada nabad ilaalinta ee taageeraya dowlada soomalia ciidamadaas oo ka imaanaya dalka itoobia ee xurgufta taariiqiga ah ay kala dhaxayso soomaalia

Feb 24, 2005 madaxwenaha iyo ra,iiisal wazaarsha soomalia ayaa doorashadoodii kadib markii ugu horaysay kusoo laabtay soomalia waxayna ka degeen magaalda jowhar waxayna safarkaasi ay kuso mareen baladweyne galkacayo boosaaso iyo baydhabo

## Golaha Baarlamaanka DFKMG Oo Kuraas Isku Tumay

March 17, 2005: gudoomiha baarlamaanka DFKMG shariif xasan shiiq adan ayaa kulan uu Nairobi ay ku yeeshen baarlamaanka DFKMG kaga dhawaaqay in baarlaanku isku raacay in aan soomalia ,lakeenin ciidamo ka socda safka hore kadib markii loo qaaday cod fartaag ah, wax yar kadib markii ay suurta gali waysay dagaalna uu ka dhacay in codka qarsoodiga ah loo qaado ciidamada safka hore in lageeyo soomalia waxaa soo xaadiray xilibaano gaaraya 217 waxaa diiday safka hore 156 , waxaana ogolaatay in lakeeno ciidanka safka hore 55, halka 6, kamid ah ay ka gaabsadeen sidaas ayaana lagu ansixiyey kadib waxaa baarlamaanka ka dhacay dagaaal feer iyo laad ayadoo lisle dhacay kuraas qeyb kamid ah xilibaanada ayaana halkaas dhiig looga daadiyey

April 29,2005 – ra,iisul wazaare cali maxamed geedi ayaa markii ugu horaysay uduulay caasimada soomalia ee magaalada muqdisho si uu uxaliyo qilaafka dowlada soo kala dhax galay eek u saabsan iyo halka ay degi doonto iyo arimo la xariira ciidanka nabad ilaalinta

May 3,2005 – qarax ayaa ka dhacay garoonka ciyaaraha ee (stadium muqdisho) halkaasi oo uu ka qudbaynaayey ra,iisal wazaare cali maxamed geedi

Qaraxaasi oo keenay qasaaro iskugu jira dhimasho iyo dhaawac

May 11, 2005 – xilibaano tiradoodu dhan tahay 152 ayaa magalada Nairobi ku yeeshay kalfadhi uu dalbaday madaxweynaha DFKMG , c/laahi yuusuf axmed

Kalfadhigaasi waxay baarlamaanku ku ansixiyeen in ay dowladu degto magaaloyinka baydhabo iyo jowhar

Iyo in ciidamo ka socda midowga Africa oo kala ah ( suudan ugaanda) iyo (carab) lageeyo soomalia kulankaasi waxaa ka maqnaa gudoomiyaha baarlamaanka shariif xasan shiiiq aadan waxaana shir gudoomiyey

Gudoomiye ku xigeenka labaad ee baarlamaanka prof, maxamed cumar dalxa

May ,12 ,2005- shariif xasan sheq Aadan oo ah afayeenka baarlamaanka KMG, ayaa sheegay in uu

Aadi doono magalada muqdisho , isla mar ahaantana xubnaha kale ee baarlamaanku ku qancini doono in ay u raacan muqdisho halkaas oo uu sheegay in kulanka labaad ee baarlamaanku lagu qabani doono

Ayadoona ay si cad usoo shaac baxday kala qeybsanaanta DFKMG, ay ku kala qaybsan jowhar iyo baydhabo; tahay halka ay degayso dowladu : magaalooyinka muqdisho

May 13, 2005 – midowga Africa ayaa magaalda adis ababa ee dalka itoobia kaga dhawaaqay in ay soomalia u diri doonaan 1,700 oo askeri kuwaasi oo ka qayb qaadanaya (amaanka) sida ay dib ugu soo celini lahaayen gacanta dowlada soomaalia ee lagu dhisay magaalada Nairobi

Ciidankaasi oo ka kala imaani doona laba dal oo kala ah (ugaanda) iyo (suudaan)

Ra,iisal wazaaraha DFKMG: cali maxamed geedi oo marka go,aankaasi uu dhacaayey ku sugnaa adis ababa ayaa sheegay in ay soomaliya aqbashay in ciidamadaas la keeno

Dhamka kale ra,iiisal wazaaraha itoobia ayaa sheegay in ay muqdisho joogaan waxa uu ugu yeeray argigixiso

Eedayntaas oo caado u ah zenaawi oo aan marnaba xusin qadiyada dhabta ah eek a dhaxayso soomalia iyo itoobia taas oo ah (dhul iyo dad) ay gumaysato itoobia

Jun 13, 2005- dowlada FKMG ah ayaa bilaawday geedi ay ugu guurayso soomalia kana guurayso Nairobi oo ay ku sugnayd mudo 9 bilood ah MDFKMG c/laahi yuusuf axmed ayaa qudbad sagootin ah waxa uu u jeediyey reer Kenya halkaasi oo ay dowlada soomalia ay ku sugnayd ilaa markii la soo magacaabay oo ah (oct 2004) waxaa halkaas kusii sagootiyey madaxwaynaha dalka Kenya mwai kibaki sagootintaas oo lagu qabtay guriga looga arimiyo Kenya ee loo yaqaano (state house) waxaana goob jog ka ahaa ra,iisal wazaaraha DFKMG cali maxamed geedi iyo xubno katirsan labada gole ee DFKMG , madaxweynaha waxa uu u safray dalka qadar ra,iisal wazaaruhuna jowhar , baarlamaanka oo la kala diray (jun 12 , 2005- ) iyo golaha waziiradu waxay u kala safrayaan gobolada dalka

Jun 25, 2005- dowlada YEMAN ayaa ku guuldaraysatay in ay heshiis garaan madaxweynaha iyo gudoomiyaha baarlamaanka DFKMG; kadib wada hadalo ay dowlada yeman uga furtay magaalada sanca ee dalka yeman kulamada ay isku soo hor fariisiinayo madaxda ugu sarayso ee DFKMG; waxay yeman ka dheceen (21/6/2005) iyo (22/6/2005) inkastoo (23/6/2005)madaxweyne c/laahi yuusuf uu kaligiis uu madaxtooyada kula kulmay madaxwenaha dalka yeman cali cabdala saalax halka gudoomiye shariif xasan uu ku qaabilay qolkii uu ka deganaa hotel taaj saba

June 30, 2005- ciidamo ka socda dunida islaamka ah oo nabad ilaalin ah oo loo diraayo soomalia sidaasi waxa lagu go,aamiyey kalfadhigii 32aad waziirada arimaha dibada ee dalalka islaamka oo ay kazoo qeyb galeen 54 dowladood oo ka mid ah 56da dal ee xubnaha ka ah ururka islaamka kalfadhigaasi oo lagu qabtay caasimada dalka YEMAN ee sanca (june 28 ilaa iyo 30kii 2005) ciidamadaas oo ku shaqeyni doona magaca qaramada midoobe (UN) WAXA KALE oo isla kulamkaas lagu go,aamiyey in la sameeyo gudi ka socda ururka islaamka oo soo arka sida dib loogu dhisi lahaa soomaalia

JANURAY 5,2006 :madaxweynaha DFKMG c/laahi yuusuf axmed iyo gudoomiyaha baarlamanka soomaalia, shariif xasan shiiq Aadan ayaa heshiis ku kala saxiixday magaalada CADAN ee dalka YEMAN heshiiskaa oo ah inay soo afjaraan xurguftii u dhexeysay laba garab ee dowlada federaalka ee jowhar iyo muqdisho ,heshiiskaas in uu dhaco waxa ku guuleystay madaxweynaha dalka YEMAN ,cali cabdala saalax oo labada garab ku casuumay dalkiisa

JANURAY 30,2006; gudoomiyaha baarlamaanka dowlada FKMG ayaa shaaca ka qaaday in kulanka koowaad ee baarlamanka soomaalia markii ugu horeysay lagu qawan doono magaalada BEYDHABO waxaana uu gudoomiyuhu markaasi uu joogay magaalada Nairobi ee dalka Kenya

FEBRUARY 11,2006; magaalada gaalkacayo ayaa waxa kulan ku yeeshay madaxweynaha DFKMG c/laahi yuusuf ,gudoomiyaha baarlamaanka iyo ra,iisal wazaaraha DFKMG cali maxamed geedi .waxana ay ka wada hadleen kulanka baarlamaanka ee qorshay nayaan in uu ka dhaco magalada BEYDHABO

FEBRUARY 18,2006; sided qab qable dagaal oo badan koodu ay kamid yihiin DFKMG. Ayaa waxa ay magaalada muqdisho ka Asaaseen isbahaysiga lamagac baxay soocelinta nabada iyo la dagaalanka argigixisada

FEBRUARY 26, 2006, baarlamaanka DFKMG. Ayaa markii ugu horaysay ku kulmay magalada beydhabo qab qablayaashia ka soo horjeeday dowlada ay ka tirsanaayen eek u dhawaaqay isbaheysiga kama ay soo qeyb gelin kulankaas. Baarlamaanka DFKMG. Waxa dalka Kenya lagu soo dhisay sanadkii 2004.

FEBRUARY 28,2006; muqdisho waxaa looga dhawaaqay golaha kacdoomka difaaca diinta iyo dalka oo ay ku dhawaaqen midowga maxaakiimta islaamigu si ay ugu hortagaan isbaheysiga la baxay la dagaalanka argi,gixisada"

March 21, 2006; waxaa magaalada muqdisho ka bilaawday dagaal Aad u culus , kaas oo socday ilaa march 23keedii dagaalkaas oo u dhexeeyey midowga maxaakiimta iyo isbahaysiga la baxay la dagaalanka argi,gixisada dad fara badan ayaa dagaalkaasi ku dhintay in ka badana guyohoodi ayey ka qaxeen .

APRIL 21, 2006; xubin ka tirsan isbahaysiga labaxay la dagaalanka argi.gixisada ayaa sheegay in ay dalka ka dhisdoonaan dowlad ay iyagu maamulaan.

May 4,2006; madaxweynaha DFKMG.c/laahi yuusuf axmed ayaa mareykanka ku eedeeyey in uu gacan siinaayo qab qablayaasha . Dagaalka.

May 4,2006; dagaal culus ayaa mar kale ka bilaawday muqdisho in kastoo ay jirtay xabad joojin.

June 2,2006; kumanaan taageersan isbahaysiga maxaakiimta islaamka ayaa mudaharaad ka dhigay muqdisho oo ay kaga soo horjeedaan mareykanka.

JUNE 4,2006; midowga maxaakiimta ayaa qabsaday magaalada balcad waxa ayna ka qabsadeen isbahaysigii la dagaalanka argi,gixisada.

June 4, 2006; ra,iisal wazaaraha DFKMG. Cali maxamed geedi ayaa xilalkii ka qaaday afar waziir oo ka mid ahaa golahii waziirada, oo ah kuwii aasaasay isbaheysigii la baxay la dagaalanka argagixisada wasiirada xilka laga qaaday waxay jagadoodu ahaayeen

Wasiirka amniga qaranka , wasiirka ganacsiga .wasiirka diinta & awqaafta iyo wasiirka dhaqan celinta maliishiyaadka iyo hub ka dhigista – waxana wasiiradaasi laga saaray golaha wasiirada dowlada fkmg. Ah ee soomaalia.

June 5,2006; midowga maxaakiimta islaamiga ayaa ku dhawaqay in ay la wareegeen magaalada caasimada ah ee muqdisho . Gudoomiyaha isbahaysiga maxaakiimta sheq shariif shiiq axmed ayaa balanqaaday inuu ay muqdisho kusoo celinayaan nabada iyo degenaansho waxa uuna intaasi sii raaciyey in ay diyaaar u yihiin in ay la hadlayaan qof kasta iyo koox walpo anagoo u daneynayna dad weynaha ayuu yiri sheq shariif.

June 14,2006; midowga maxaakiimta ayaa qabsaday magaalada jowhar oo xarun u aheyd qab qablayaasha dagaalka. Sheq shariif sheq axmed ayaana isla maalintas la hadlay shacabka reer jowhar waxaana uu yiri waxaan idin wadnaa inan idinku dhaqno shareecada islaamka.

June 14, 2006; baarlamaanka DFKMG. Ayaa magaalada baydhabo ku an sixiyey in soomaalia la keeno ciidamo shisheeye. Gudoomiyaha

baarlamaanka. Shariif xasan sheq Aadan ayaa sheegay in cod bixin la qaaday waxaana in ciidamo shisheeye la keeno ansixiyey 125 xilibaan waxaana diiday 73 xilibaan.

June 15, 2006; magaalada baladweyne ee xarunta gobolka hiiraan waxa gacanta ku dhigay midowgii maxaakiimta islaamiga.

June 15, 2006; waxaa soo shaac baxay in mareykanku uu qab qablayaasha dagaalka soomalia mudo 3sano ah uu siini jiray lacag dhan $100,00 ilaa $150,00 bil kasta xili laga awood roonaaday qabqablayaashii , qaarna ay isaga bexeen isbaheysiga.

June 15, 2006; magaalada new york ayaa waxa lagu qabtay kulan looga hadlay arimaha soomaalia waxaana kulankaasi lagu aasaasay urur ka kooban dalalka mareykanka, Britain, midowga yurub, Italy. Nowrwayn.sweden.iyo Tanzania oo loo bixiyey soomalia contact group.; waxan goob joog ka ahaa UN IYO AU. Kulankaasi laguma marti qaadin ururka jaamacada carabta (arab league) camar muusa ayaa sheegay in ay ka shiri doonaan xaalada cusub ee soomaalia waxaa uun ka digay ciidamo shisheeye oo la keeno soomaalia .

June 15, 2006; madaxweynaha DFKMG. C/laahi yuusuf axmed iyo gudoomiyaha maxaakiimta shiiq shariif shiiq axmed ayaa madaxweynaha dalka YEMAN cali cabdala saalax ka ogolaaday in ay wada hadlaan.

June 22, 2006; heshiis ayaa magaalada qartuum ee dalka suudaan waxa uu ku dhax maray midowga maxaakiimta islaamiga iyo dowlada federaalka kumeel gaarka ah .shirka heshiis kaasi lagu gaaray waxaa soo qabab qaabisay dowlada suudan waxaana shir gudoomiye ka ahayd jaamacada carabta. Kulankaasi waxaa ka qeyb galay wafdi ka socday DFKMG. Oo uu hogaaminayey madaxweynaha DFKMG. C/laahi yuusuf axmed oo ay weheliyaan ra.iisal wazaare cali maxamed geedi iyo gudoomiyaha DFKMG. Shariif xasan shiiq Aadan. Dhanak midowga maxaakiimta islaamka wafdiga ka socday waxa ay ka koob naayeen 10 xubnood.oo uu hogaaminaayey Dr. Maxamed cali ibraahim

Heshiiskaasi waxaa labada dhinac u kala saxiixay wasiirka arimaha dibada DFKMG. C/laahi sheeq ismaacil iyo Dr.maxamed cali ibraahim. Qodobada lagu heshiiyey waxaa ka mid ahaa (1) in labada

dhinac ay joojiyaan hujuumka ay isku wadaan xaga milateriga & xaga saxaafada (2) labada dhinac in uu midba midka kale aqoonsado (3) in la furo maxkamad la soo taago dembiilayaashii dagaalka (war crime trial) (4) dhowrida midnimada soomaalia iyo dhowrida wada jirka dhulka soomaalia (5) .in dadka soomaaliyeed lagu caawiyo dib u dhiska iyo hay,adihii qaranka . Dib u dejin iyo horumarin.

June 24, 2006; kulan aad u balaaran oo ay kazoo qeyb galeen waxgarad, culuma,udiin , odoyaal iyo dad magac ku leh dalka oo lagu qabtay muqdisho

Ayaa lagu magacaabay labo gole oo ah. Golaha fulinta ee maxaakiimta islaamiga ah ee soomaaliyeed (kaasi oo bedeli doona midowga maxaakiimta islaamiga ah )' iyo golaha shuurada soomaaliyed sababaha golahan loo magacaabay ayaa ah sidii howlaha maxaakiimta loo gaarsiin lahaa damaan dalka oo dhan. Sheq shariif sheq axmed ayaa loo magacabay gudoomiyaha golaha fulinta ee maxaakiimta islaamiga ah e soomaliyed. Waxana gudoomiye kuxigenka koowad loo magacaabay sheq yuusuf indha,cade. Gudoomiye kuxigenka labaadna sheeq c/qaadir cali cumar , gudoomiyaha golaha

shuurada waxa loo magacaabay sheq xasan daahir weys. Gudoomiye ku xigen sheeq cumar iimaan abuubakar. Gudoomiye ku xigeenka labaadna sheiq c/laahi afrax Aasbaro, xoghayaha shuurada waxa lo magacaabay sheiq maxamuud suuley' golaha shuurada ayaa waxa ay ka koobnaayen 88 xubnood kuwaas oo ka kala socda qeybaha kala duwan ee bulshada

Septemper 18, 2006 ; waxaa magaalada beydhabo ka dhacay qarax ismiidaamin ahaa oo lagu damacsanaa in lagu dilo madaxweynaha DFKMG, c/laahi yuusuf axmed. Waxa qaraxaasi ku dhintay dhowr qof oo uu ku jiray nin ay walaalo ahaayeen madaxweynaha DFKMG, waxaana halkaasi ku gubtay dhowr gawaari.ayadoo qaraxaasi uu ka dhacay meel wax yar ujirta halka uu ka socday kulanka golaha baarlamaanka DFKMG.oo u fadhiyey cod bixin lagu ansixiyey gole wasiiro ah oo uu soo dhisay ra.iisal wasaaraha DFKMG. Kulankaasi oo aha meshii uu wax yar ka hore kazoo baxay c/laahi yuusuf inta aanu qaraxa dhicin ka hor

September 24, 2006; midowga maxaakiimta islaamiga ayaa la wareegay gacan ku heynta

magaalada kismaayo. Kadib markii uu magaalada ka baxay wasiirkii gaashaandhiga ee DFKMG. Ahaana hogaamiyihii isbahaysiga dooxada juba col. Bare Aadan shire bare hiiraale. Waxa uuna magaalada ka baxay markii ay ciidamada maxkamaduhu soo gaaren duleedka magaalada kismaayo.isbayesigii dooxada jubana ayaa u kala jabay labo garab sidaasna ay maxkamaduhu kusoo galeen magaalada kismaayo ayada oo an wax dagaal ah ay ka dhicin

November 26, 2006; waa markii ugu horeysay ee ciidamo itoopiyan ah oo watay 50 taangiyada dagaalka ah ay soo galeen magaalada galkacayo ayagoo ka faa,iidaysanaya kala qeyb, sanaanta soomaalia

December 28, 2006; midowgii maxaakiimta islaamiga ayaa isaga baxay magaalada muqdisho. Waxaana arintaasi shaaca ka qaaday gudoomiyaha gudiga fulinta sheq shariif sheq axmed oo qadka taleefoonka kula hadlay telefishanka al Jazeera oo yiri waxaan magaalada ka saarnay hogaanki iyo xubnahii ka howl galaayey. Asagoona intaasi ku daray in maxkamadaha islaamiga ay mideysan yihiin ‘ waxa uuna ka bixitaanka muqdisho uu ku timaamay xeelad milateri

anay tahay waxana markaasi ka dib magalada muqdisho soo galay ciidamo itobiyan ah

January 1, 2007; maxkamadaha islaamiga ah ayaa iskaga baxay magaalada kismaayo ee xarunta gobolka jubada hoose

January 17, 2007; golaha baarlamaanka DFKMG,ah ayaa kulan ay ku yesheen magalada baydhabo waxa soo xaadiray 192 xilibaan halka 183 ka mid ahi ay codka kalsoonida kala noqdeen gudoomiyaha baarlamaanka shariif xasan shiiq adan ayadoona 9 kamid ah xilibaandu ay diiden, waxaana kulankasi shir gudoominayey gudoomiye ku xigeenka baarlamaanka cismaan cilmi boqore laakiin shariif xasan shiiq aadan ayaa arinkaasi gashaanka u daruuray

January 31, 2007; gudoomiyaha baarlamanka DFKMG, waxaa loo doortay shiiq adan madoowe (10 musharax ayaa isku soo taagay xilka gudoomiyaha baarlamaanka waxana markiiba iska casilay 3 – musharax waxaana tartamay 7- musharax ayadoona Aaqirkii ay isku soo hareen 2-musharax oo kala ah shiiq Aadan madoowe iyo ibraahim maxamed kiish bur. Waxana 153 cod ku guuleystay shiiq Aadan

madoowe halka ibraahim kiishbur uu helay 50 cod hase yeeshee shariif xasan shiiq Aadan aya sheegay in uu weli yaha gudoomiyaha baarlamanka DFKMG. Xilka waxan dhiibi karaa markii si cadaalad ah la,iga qaado oo la raaco dastuurka ayuu yiri shariif xasan shiiq Aadan  asagona sheegay in baarlamanku uu la heyste u yahay ciidamada itoobiya shariif xasan aya intaasi sii raaciyey inuu sii wadi doono howlihii dib u heshiisiinta uu ka dhax waday bulshada soomaliyed waxa uuna ku tilmaamay doorashada gudoomiyenimada ee shiiq Aadan madoowe ay ka soo shaqeysay dowlada itoobiya waayo waxay waligeed ku taameesay sidii uu shiiq Aadan madowe u noqon lahaa gudoomiyaha baarlamaanka madaama ay manta u heshay fursad

June 5, 2007; Ra,iisal wasaaraha itoobiya meles zenawi ayaa magalada muqdisho ku tagay kulan an horay loo sii shaacin oo qarsoodi ahaa oo saxaafada aduunka ugu yeertay safar ku soo bood ah

June 8, 2007; Aadan cabdule cusmaan Aadan cade oo ahaa madaxweynihii ugu horeeyey soomaalia aya ku dhintay magaalada Nairobi ee dalka Kenya (Aadan

cade waxa uu noola intii u dhexeysay 1908 ilaa june 8, 2007)

October 29, 2007; cali maxamed geedi ayaa iska casilay Ra,iisal wasaaraha DFKMG. Kadib markii uu qilaaf soo kala dhax galay geedi iyo c/laahi yuusuf markii dembe Ra,isal wasaare geedi aya shegay in sababta qilaafka in u salka ku haayo batroolka soomaaliya geedi aya waxa uu Ra,iisal wasaare ahaa intii u dhexeysay November 3, 2004; ilaa ogtober 29, 2007;

November 4—10 2007'; waxa uu ahaa tadobaad ay ciidamada itoobiya magaalada muqdisho ay ka geysteen xasuuqii ugu daranaa ayado wararka qaar ay sheegayan in hal maalin la dilay dad shacab ah oo gaaraya ilaa 50 qofood.

November 22, 2007; col.nuur xasan xuseen (nuur cade) ayaa loo magacaabay Ra,iisal wasaaraha DFKMG. Waxana lagu dhaariyey magalada baydhabo ee xarunta gobolka bay November 24, 2007.

December 2, 2007; col nuur cade ayaa soo magacaabay golihiisa xukuumada oo ka koobna 73 xubnood oo isagu jira 31 wasiir 11 wasiiru dowle iyo

31 wasiir ku xigeen maalintii xigtay waxa soo baxday in wasiiro uu magacaabay ay is casileen iyagoo tilmaamay in markii lasoo magacabay an lagala tasahan iyo in aan magacaabista wasiirada an la waafajin nidaamka 4.5 oo ay ku salaysantahy DFKMG, ee awood qeybsiga qabiilada. Waxa kale oo soo shaac baxay in beelo soomaliyeed aysan ku qanac sanayn habka loo soo xulay golaha wasiirada .col nuur cade safarkisii ugu horeeyey waxa uu December 5. 2007. Ugu ambabaxay magalada adis ababa ee dalka itoobiya

December 2, 2007. Hay,adaha u dooda xaquuqda Aadanaha ayaa sheegayin sanadka 2007. Tirada dadka soomalida ah ee lagu dilay soomalia in ay gaareyso ilaa lix kun (6000) oo qof |tirada la diiwaan geliyey waa 5,930 oo dhimasho ah 7,980 oo dhaawac ah iyo 717,784 oo barakacay|

December 29, 2008’ waxaa xilka madaxweynaha DFKMG. Iska casilay c/laahi yuusuf axmed

January 30, 2009; kulan ay xubnaha baarlamanka DFKMG ay ku yeeshen dalka jabuuti ayaa waxa madaxweynaha DFKMG. Loogu doortay shiiq shariif shiiq axmed musharixii xigay ee codadka badan ka

helay baarlamaanka waxa uu ahaa maslax maxamed siyaad bare oo uu dhalay madaxweynihii saddexaad ee jamuuriyadii dimuqraadiga soomaaliya

Febuary 13, 2009; madaxweynaha DFKMG. Shiiq shariif shiiq axmed oo ku sugnaa dalka jabuuti ayaa waxa uu Ra,iisal wasaare u doortay cumar cabdi rashiid cali sharmaarke oo uu dhalay madaxweynihii labaad ee JAMUURIDA soomaaliya
Cabdirashiid cali sharmaarke oo la dilay October 15, 1969

## GOBOLLADA IYO DEGMOOYINKA DALKEENNA

### 1. GOBOLKA BANAADIR

1) Hodan
2) Shingaani
3) Howlwadaag
4) Shibis
5) Boondheere
6) Yaaqshiid
7) Kaaraan
8) Xamar jabjab
9) Xamar weyne
10) Cabdicasiis
11) Wadajir
12) Dharkeenley
13) Waaberi
14) Wardhiigley
15) Hili waa
16) Dayniile

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Muqdisho dhaqaalaha gobolka Banaadir waxa uu ku tiirsan yahay Ganacsiga.

**2. GOBOLKA SHABEELAHA DHEXE**

1) Jowhar
2) Balcad
3) Cadale
4) Aadan yabaal

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Jowhar, dhaqaalihiisu waxa uu ku tiirsan yahay beerha iyo xoolaha nool sida ariga iyo geelka

**3. GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE**

1) Afgooye
2) Awdheegle
3) Bariire
4) Golweyn
5) Marka
6) Qoryooley
7) Baraawe
8) Wanlanweyn
9) Kuntunwaaray
10) Sablaale

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Marko dhaqaalihiisu waxa uu ku tiirsan yahay Beeraha Kaluumaysiga iyo Xoolaha nool

**4. GOBOLKA HIIRAAN**

1) Baladweyne
2) Buulo burde
3) Jalalaqsi
4) Matabaan

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa baladweyne dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha nool iyo Beeraha

**5. GOBOLKA GALGADUUD**

1) Duusa-mareeb
2) Cabudwaaq
3) Ceelbuur
4) Ceeldheer
5) Cadaado

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa dhuusa-mareeb dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha nool

**6. GOBOLKA MUDUG**

1) Gaalkacayo
2) Hobyo
3) Jariiban
4) Xarar dheere
5) Goldogob

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Gaalkacayo dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha Nool

7. **GOBOLKA NUGAAL**
   1) Garoowe
   2) Eyl
   3) Burtinle

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Garoowe dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha Nool

8. **GOBOLKA BARI**
   1) Boosaaso
   2) Qandala
   3) Iskushuban
   4) Bandarbayla
   5) Caluula
   6) Qardho

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Boosaaso dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Ganacsiga iyo Kaluunka

9. **GOBOLKA SOOL**
   1) Laascaanood
   2) Xudun
   3) Caynabo

4) Taleex

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Laascaanood dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha Nool

**10. GOBOLKA SANAAG**

1) Ceerigaabo
2) Laasqoray
3) Ceel afweyn
4) Baran

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Ceerigaabo, dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha nool gaar ahaan Ariga,

**11. GOBOLKA TOGDHEER**

1) Burco
2) Owdweyne
3) Sheekh
4) Buuhoodle

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Burco. Dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Xoolaha nool gaar ahaan GEELA IYO ARIGA.

**12. GOBOLKA WOQOOYI GALBEED**

1) Hargeysa
2) Berbera
3) Gabiley

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Hargeysa dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay xoolaha nool

**13. GOBOLKA AWDAL**

1) Boorama
2) Saylac
3) Lug haye

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Boorama dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Ganacsiga iyo Xoolaha nool.

**14. GOBOLKA BAAY**

1) Baydhabo
2) Buurhakaba
3) Diinsoor
4) Qansax dheere
5) Bardaale

Gaobolkaani magaalo madaxdiisu waa Baydhabo dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Beeraha iyo Xoolaha nool.

### 15. GOBOLKA GADO

1) Garbahaarey
2) Luuq
3) Ganaane
4) Doolow
5) Balad xaawo
6) Ceelwaaq
7) Baardheere

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Garbahaarey dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Beeraha iyo Xoolaha nool.

### 16. GOBOLKA BAKOOL

1) Xudur
2) Waajid
3) Yeed

Gobolkaani magaalo madaxdisu waa Xudur dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Ganacsiga iyo Xoolaha nool.

**17. GOBOLKA JUBBADA DHEXE**

1) Bu’aale
2) Dajuumo
3) Saakow
4) Jilib

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waa Bu,aale dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Beeraha,

**18. GOBOLKA JUBBADA HOOSE**

1) Kismaayo
2) Afmadow
3) Badhaadhe

Gobolkaani magaalo madaxdiisu waxaa Kismaayo dhaqaalihiisuna waxa uu ku tiirsan yahay Ganacsiga Xoolaha nool Gaar ahaan Lo’da

## NOOCYADA QEYRAADKA DALKA SOOMAALIYA

SIDEEDABA KHEYRAADKU WAA SEDAX NOOC OO KALA AH

1. kuwa aan marna dhamaan marka loo eego aragtida iyo aqoonta bini,aadanka oo sikasta oo loo isticmaalo ama logu takrifalo aan is dhimin waxaa ka mid ah awoodaha kala duwan ee laga heli karo Qoraxda mowjadaha Badda iyo Dabaasha
2. kuwo istara ama cusboonaada oo iyagu hadii sifican loo isticmaalo lana dhowro taran yeesha laakiin hadii si xun loogu takrifalo ama lagu talax tago dhaawac weyn oo anay si fudud ugu kicin la gaarsiin karo ama lawaayi karo waxaa ka mid ah qeybahaas dhirta biyaha iyo neefleyda kala duwan ee beriga ku nool ama duurjoog ha noqdeen iyo tan badda webiyada iyo harooyinka ku nool
3. qeybta sadexaadna waxay u taagan tahay kuwo jiritaankoodu kooban yahay Aana istarin oo hadii la isticmaalo  aan dib usoo noolanin waxaana kamid ah Macdanta iyo shidaalka

Marka aynu eegno wadamada aduunka, sadexdaa qeybood oo an soo sheegnay ilaahey uma simin midka ugu muuqaalka weyn (Qorraxda) hadaan tusaale usoo qaadano waxa inoo muuqaneysa in aan wadamada aduunku u sineyn helitaankeda oo qaarna maalintii ay heli karaan 12 saacadood, qaarna markii laysku celceliyo 6 saacadood, ayna gaarin isla markaana awooda ay aad u yar tahay. Hadaba in kastoo ay tahay in kheyraadkaasi dhamaantood si habsami ah miisaaman oo aad looga baarandegay looga faa,iideystaa. Hadaba waa in il gaar ah lagu eego. U baahan oo xusbad la,aantu ay Khatar gelin kartaa labada dambe. (kuwa tarma iyo kuwa aan tarmin) isla markaa qeybta aan iskabin sida Macdanta, shidaalka. Iwm. Adeegsigoodu wuxuu u bahan yahay aqoondheer aragti fog iyo ilaalin in lagu saleeyo

Murti soomaaliyed baa leh, abeesadu waxay cuntaa Ciida oo ay ku nooshahay, laakin abeesadu, caqli badnaan, taxadar. Iyo dhaqaale intay ka qabto habeena waa qadaa, habeena ciid bey ku casheysaa. Waa qiyaasi karnaa, ciidu in aysan Af abeeso ku dhamaani Karin, abeesaduna ciida cunin laakin murtida soomaaliyeed waxay inoo tilmaamaysaa, qof

kasta ama umad kasta baahi kasta ha qabeene in ay waajib ku tahay in ay hantidoodu dhowraan. Ama ay tashiilaan, si xilkasnimo ay ku jirtona uga faa,iideystaan sida ciidana ha ubadnaatee. Waxa kale oo iyana waajib ah in aan xaqlaha soomaaliyed ogolaan in cid kale u cunto oo ku naaxdo isna dayac iyo dacdaro la duljoogo. Ama macluul ugu dul dhinto,

Qoraalkan oo digniin iyo wargelinba iga ah, una qeybsanaan doona sadex qeybood. Hadii Eebe raali ka noqdo, qeybta ugu horeysa waxan kusoo qaadanaya qeyraadka badda

## KHEYRAADKA BADDA

Soomaliya waxay ka mid tahay dalalka aduunka ugu xeebta dheer, waxaana dhohararka xeebta soomaalia, lagu qiyaasaa 3300. Oo km, marka aan lagu darin jasiiradaha aduunka manta la joogona sida aad ka warqabtaan waxa gabaabsi noqday Kheyraadkii dabiiciga ahaa. Waqtigaan casriga ahna Kheyraadkii dalka waxa ay lamid noqdeen hawada la neefsanaayo, sidaa darteeda dalalka aduunku waxay tartan ugu jiraan. Sidii ay u heli lahaayen kheyraad ay ku noolaadan kuna dhismaan oo horumar ugaraan hadaba waqti cabsi mustaqbalka laga qabo'iyo hunguri awgii dalalka aduunka qaarkood dayax in ay risiq u raadsadaan u qalab sameynayaan ayaa nasiib daro dowladii dhexe ee soomaalia xididada loo siibey. Waxaa markaa muuqday dal Bad iyo Beri dayacan oo an cidi laheyn dadka kheyraadka soomaaliya boobkooda ku howlan. Waxaa qaakood dhegehooda ay maqleen, baaritaano la sameeyey. Todowaatanadii oo lagu qiyaasayey kheyraadka badda soomaaliya, mid kuwaasi kamid ah. Oo ka hadlayey xeebta soomaaliya ee gacanka cadmeed, wuxuu ku qiyaasay kalluunka ku jira 100,000mt. Isla ,markaana wuxuu raaciyey. In ay tahay Badd hadii

laga faa,iideysto noqon karta kaalinta koowaad ee dhaqaalaha dalka, ee lacagta adag. Hadii la qiyaaso inta ay la egtahay xeebta soomaliyeed, qeybta gacanka cadmeed. Oo aynu xusnay waxa hubaal ah in ay Aad ugu yar tahay sida darteed. Waxa dhici karto in uu 10 jeer ka badnaan karo markii dowladii dhexe. Meeshii kabaxday, waxaa si toos ah u bilowday boob iyo hooshid an aduunka u kala harin. Oo lagu bilaawey kheyraadkii Badda soomaliya, waxa taa raacday in la adeegsado habab. Dabasho oo aduunka mamnuuc ka ah. Oo la ogaaday in ay ciribtiraan. Kheyraadka iyo in kaluumeysatadii danyarta aheyd. Ee dalka u dhalatay qalabkii ay ku jilaaban jireen oo noloshoodu ku xirneyd. Maraakiibtii boobka usoctay cagta ay mariyeen kheyraadka ka sokow wadamada horumaray. Waxa kale oo welwel weyn ku haya, wasaqda u huursan. Meshii lagu shubi lahaa, hadaba xeebta soomaaliya. Waxay noqotay meel baahidii kheyraadka iyo wasaqda qubisteediiba xal howl yar loogu helay, waxa labadaasi arimood aduunku ugu dhaqaaqay si aan dhuumasho layen, madaama aysan jirin cid kula xisaabtameysa. Iyo cid debi kusoo ogaysa haday qawaaniinta aduunka u yaal oo dhan

jebiyaan,halkaa waxa kaalin ku lahaa oo gabay (garyaqaanadii iyo aqoonyahanka soomaaliyed)

In xeebta soomaaliya noqoto meesha wasaqda aduunka loo dhoofiyo waxa horseeday dad badan oo hurdeyna indhahooda kusoo jeediyey

Heshiiskii 1992 dhexmaray laba shirkadood oo midna kazoo jeedo wadanka Switzerland” tan kalena saldhigeedu yahay wadanka Italy” oo dhinac ah iyo laba masuul oo soomaliyeed oo dhinac ah shirkadahaas horseedka noqday iyo kuwii ka dambeeyey midkoodna ma tixgelin heshiisyada saxeexeen madama hore maray oo dhami lagu mamnuucaya geynta wasakhda ee caalamka sadexaad iyo ka baayyacmushtar keeda. Waxa kale oo heshiisyadaasi dhigayeen in aan la ogoleyn heshiis dhex mara wadamada ama shirkad iyo wadan (sida soomaliya ka dhacday) kaas oo lagu dhoofinayo wasakhda aan ka aheyn marka wadankaasi leeyahay awood teknoolaji oo uu kaga takhluso, sida kan u dhexeeya faransiiska iyo jarmalka o kan dambe wasakhda loogu dhoofiyo. Inkasto oo boobka dhulkeena lagu hayo ay ka xuntahay geerida silica leh oo lagu talo galay dadka soomaaliyed, oo ka

imaanayso qashiinka magaaloyinka iyo kan (nuclear waste) loo yaqaan oo aan qaarkii malaayiin sano ku tirtirmin

Run ahaantii, boobka badda iyo qubista wax axil weyn iska saaray mareeg ka mid ah mareegaha soomaalidu beryahan dambe wax isugu tebiso ee loo yaqaano “internet”. Webkaasi oo la yiraahdo

“somalitalk.com” oo aan ilaahey uga baryayo in uu maamulkisu ka abaal mariyo xaqa ay ku dagaalamayan, aniguna waxaan hawada u marinayaa mahad balaaran oo an laso koobi kareyn sidii ay usoo aruuriyen ayna ugu daba jiraan inkasta oo jawaabtoda noqotay qaniinyo qaniinya ka fujisa” oo dhicii dhac kaga jawaabeen, dhibkii na gaaray qaar an dembi gelin waxa iyana hawl galay oo ugu horeyn boobka iyo qashinka diiday ragga wadaniyiinta dadkeena badankiisu uu yaqaan qaar kalena ku sheegaan ciidanka badda ee soomaaliya, halka wadamada ina dhacaaya ay ku tilmaamen burcad badeed, caalamku qaarkiisna gaarsiyeen heer argagixiso.

Peter lehr oo ah ninkii qoray “violence at sea” piracy in the age of global terrism wuxuu xusay in burcad

badeeda soomaalida ay sanadkii madax furasho ku helaan qiyaastii 100 milyan oo dollar, laakin bada soomaaliya laga xado oo dowladaha yurub iyo Aasiya ka xadaan xoolo uu ku qiyaasay 300 oo milyan oo dollar.

Wadamadii hour maray oo dhaca iyo hoosidda badaha soomaaliyed aya usoo qalab qaatay markii ay soo bexeen ragas an kor kusoo xusay, maraakiibtoodii wax dhacaysayna waxay nabad gelyo ka dalbadeen dowladahoodii, waxay u qeybsameen labo qeybood (A) qeybta dastuurka u ogolaaday in maraakiibtooda xeebaha soomaliya ka kalluumeysta ay ku daraan cutubyo ka mid ah ciidamada qalabka sida  ay gar iyo gardaroba u difaacan maraakiibtoda, qoladaa hore waxay qaanuunkodu ka Helen (la jiifiya banana la joojiya banana) isla markaasna ciidankaas qaaska ah waxa loo diyaariyey hub gaar ah oo duruufihii ay hore ula kulmeen iyo kuwa ay la kulmi karaan marka ay boobayan xeebaha soomaliya ay mar walba ku gacan seyraan (B) qeybta aan dastuurkoodu ogoleyn in ciidamadooda qalabka sida si dadban mooyee si toos ah u difaacan maraakiib kalluun oo dad khaas ahi leeyihiin. Waxay markaa iyana banaysteen in ay furan xeryo tababar oo fara

badan, xeryahaas oo lagu tababaraayo rag calooshooda u shaqeystayaal ah oo la saarayo marakkibta boobka ugu baxa xeebaha soomaliya

Dalka spain oo lagu tababarayo ciidan calooshood u shaqeystayaal ah oo maraakibta boobka xeebaha soomaliya u socota loogu talo galay. Waxa mashruucaas uu dhigayaa in markab kasta la saaro rag calooshooda u shaqeystayaal ah isla markaana wato hub aad uga tiiro dheer kan lagu qiyaaso in ay wataan nimanka soomaaliyed oo dhaca diidani iyo kuwa laga yaabo in ay ku soo hoos dhuuntan oo maraakiibta xamuulka ah af duubtaan,

Sidaan kor kusoo xusay qoraalkan qeybtiisa hore waxaynu si kooban uga hadalaynaa badaha soomaliya oo khatar weyn ku sugan" isla markaana jiritaankiisa nafleyda badaha soomaliya 100% ku xerebtahay.

## KHEYRAADKA XOOLAHA

Xoolaha la dhaqdo kuwasoo loo qeybiyo afar qeybood oo kala ah 1 Geel 2 Lo 3 Ari 4 Ido geela iyo lo,da waxaa lisku yiraahda ishkin

1. Geela kan labka ah waxa loogu yeera Rati halka kan dhadiga ahna Hal marka ay yaryaryihiina waxa la yiraahda Qurbac iyo Nirig
2. Lo,da neefka labka ah waxa la yiraahda Dibi kan dhadigana Sac marka ay yaryaryihiina waxa la dhahaa Weyl iyo Weyl ama Aalo.
3. Riyaha neefka labka ah waxa logu yeeraa Orgi halka kan dhadigana la dhaho Ceesaan marka ay yaryar yihiin waxa la dhahaa waxar iyo maqal
4. Idaha neefka dhadiga ah waxa la dhahaa Wan (SUMAL) kan dhadigana Lax (sabeen) marka ay yar yar yihiina Neyl ama Baraar

## KHEYRAADKA DHIRTA LA BEERTO

Dalagyada soomalidu beerato aya waxa ay yihiin dalagyo aad u wanaagsan isla markaana an ka bixin wadamada affica qaarkood waxana shaxda hoos ku qoran ay muuinaysaa magacyada dalaga iyo inta ay ku bislaato

Magaca iyo inta ay ku bislaato

- Galeyda 90 beri
- Masagada 90 beri
- Sisinta 90 beri
- Muuska 180 beri
- Digirta 80 beri
- Yaanyada 80 beri
- Babayga 90 beri
- Bataatiga 180 beri
- Lowska 120 beri
- Canbaha 6 sano

## MAGACYADA GEED MIROODKA KA BAXA DALKEENNA

Mareer, Hohob, Gud, Dhafaruur, Dhuwan, Ontor, Deegaan, Dhebi, Gob, Miracas, Tukelalmi, Murcood, Kabash, Ashkax,Shanfarood, Barde, Dhamag qoone

## MASAAFADA GOBOLKA BANAADIR IYO DEGMOOYINKA DALKA

- Xamar 247km beydhabo
- Xamar 550km dhuuso mareeb
- Xamar 111km marko
- Xamar 1600km hargeysa
- Xamar 90km jowh
- Xamar 1220km laascanood
- Xamar 335km beledweyne
- Xamar 925 km garoowe
- Xamar 485km bu’aale
- Xamar 1505km bosaaso
- Xamar 500km kismaayo
- Xamar 1800km boorame
- Xamar 430km xudur
- Xamar 1340km burco
- Xamar 505km garbahaarey
- Xamar 1450km ceerigaabo
- Xamar 750km gaalkacayo

Hadaba shaxdaan kale waxa ay qeexaysaa fogaanta ay isu jiraan qeybo kamid ah magaaloyinka dalkeena soomaaliya

- Muqdisho iyo afgooye 30km
- Afgooye iyo buurhakaba 164km
- Buurhakaba iyo beydhabo 66km
- Beydhabo iyo luuq 150km
- Beydhabo iyo xudur 155km
- Luuq iyo doolow 80km
- Luuq iyo garbahaarey 69km
- Garbahaarey iyo baardheere 129km
- Baardheere iyo beydhabo 195km
- Jilib iyo baardheere 260km
- Kismaayo iyo jilib 114km
- Afmadow iyo kismaayo 139km
- Dhoobley iyo kismaayo 195km
- Marka iyo muqdisho 113km
- Baraawe iyo marko 193km
- Jilib iyo baraawe 168km
- Muqdisho iyo jowhar 95km
- Jowhar iyo buuoburte 121km
- Buuloburte iyo baledweyne 116km
- Feerfeer iyo baledweyne 45km
- Cadale iyo jowhar 140km

- Ceeldheer iyo cadale 185km
- Ceelbuur iyo ceeldheer 162km
- Sindago iyo ceejbuur 110km
- Baledweyne iyo sindago 164km
- Galkacayo iyo sindago 220km
- Hobyo iyo gaalkacayo 256km
- Garoowe iyo gaalkacayo 260km
- Eyl iyo garoowe 219km
- Qardho iyo garoowe 222km
- Boosaaso iyo qardho 258km
- Bandarbayla iyo qardho 221km
- Iskushuban iyo caluula 280km
- Bareeda iyo caluula 40km
- Baargaal iyo caluula 105km
- Laascaanood iyo garoowe 132km
- Ceeldhaab iyo laascaanood 141km
- Ceerigaabo iyo ceeldhaab 255km
- Burco iyo ceeldhaab 120km
- Berbera iyo burco 148km
- Hargeysa iyo gebiley 70km
- Burco iyo hargeysa 177km
- Boorama iyo gebiley 52km
- Saylac iyo borama 269km
- Lowyacado iyo saylac 21km

- Yeed iyo xudur 115km
- Buuleburte iyo xudur 242km

## DHAQAALAHA SOOMALIYA

Ilaahay wadan walbo wuxuu ku maneystay nimcooyin, wadanka soomaliya waxa uu ka dhigay wadan. Hodan ah arrintaasi waxaa daliil u ah arimaha soo socda,

Marka aad fiirisid wadamada aduunka. Wadan walbo dhaqaalihiisu waxa uu ku salaysanyahay ha lama labo arimood, sida wadanka Sucuudiga oo dhaqaalihiisu ku tiirsanyahay saliida ceyriinka ama batroolka, wadanka finland asaguna dhaqaalihiisu waxa uu ku salaysanyahay geedaha ama alwaaxda, sidoo kale wadanka Iceland dhaqaalihiisa waxa uu ku tiirsanyahay kalluunka. Waxaad kale oo ad arkaysaa wadamo kale oo uu dhaqaalahoodu ku tiirsan yahay dalxiiska halka kuwo kalena ay dhaqaalahoodu ku tiirsan yihiin wax soosaarka wershedaha ama ticnoolajiyada hadaba waxaa mudan in su,aal fiican la is weydiiyo wadanka soomaliya dhaqaalihiisu muxuu ku tiirsan yahay.

Dhaqaalaha soomaliya waxa uu ku tiirsan yahay ama uu ku salaysan yahay waxa yaabo faro badan ayna sabab u tahay nimcooyinka uu ilaahey ku maneystay (alxamdu lilaah) taasna waxa ku mahasan alaah SWC

Waxaa ka mid ah qeyraadka  wadanka soomaaliya uu ilaahey siyey sida Xoolaha Dhulbeereed Xeeb Aad udheer oo laga kaluumeysani karo iyo nimcooyinka dhulka ku Aasan ee an laga faa,iideysan wali sida Birta,  Dahabka, uraniumka, Saliida, Shidaalka iyo wax yaabo faro badan oo aan la soo koobi Karin kuwaasi oo ay kamid yihiin Dhul bilicsan, oo dalxiika ku wanaagsan sida dhul baraha aduunka ee ekvatoria ama raaskambooni halkaasi oo ah meel ay aduunka oo dhami ay u soo dalxiis tagi karaan iyo waliba halka ay webiga jubba iyo badda meesha ay iskaga darsamaan waxayna ku talaa degaanka goobweyn oo qiyaastii 30km u jirta magaalada kismaayo

Waxana intaasi sii dheer soomaaliya in ay ku taalo dhul istaraatiji ah markii loo fiiriyo (geopolitical) taas oo micnaheedu yahay in ay soomaaliya isku xiri karto qaaradaha Africa Aasiya iyo yurub waana dhul ku wanaagsan dhinaca (logistica) oo ay noqon karto dhul beecmushtaraad.

Soomaaliya ayadoo ilaahay uu siiyey nimcooyinkaas oo dhan hadana waxaad arkeysaa in ay dadka soomaaliyed ay yihiin kuwa faqri ah o saboolnimo iyo macluul ay ku yihiin dalkooda waxa ayna maciin bideen in ay wadamada asaagooda dawarsadaan iyaga dhexdoodana islaaya. Taasna waxaa sabab u ah damaca wadamada deriska ah iyo kuwa ku bohooway jaamacada carrabta iyo dhagarta mareekanka. Yurubta galbeed iyo barigaba waliba waxaa sii dheer syaasiinta soomaaliyed ad mooda inay qeyb ka yihiin dhibaatada dalka ayadoo taasina ay sababto siyaasinta dalka hogaaminaysa badan koodu caruurtooda iyo ehelkooda ay kusoo ogaadan meel dalka kabaxsan dhibtaasi ay wax saameyn ah ayna ayagu ku yeelanaynin

## MAGACYADA HAADDA AMA SHIMBIRAHA KUNOOL SOOMAALIYA

Baanbow, abooto yaxaas, balanboolo. Baqalyo. Bogcad, boqonlow, boor lab. Buli. Ciiro. Cirsankayeedh. Curcur, daa,uus, daadwad, digiiran diridiri, dhawdhawley dhigloow, durdur fiin fiidmeer. Galeydh gabley gili gilingil gorgor garoyo tuke haad geel iyo kuwa kale an halkan lagu so kobi Karin